



Korona fayras (COVID-19): Miyaan milkiilaha dhulka la galaa qorshaha dib u bixinta kirada?

-
- ❖ **Akhri macluumaadkaan kaliya haddii aad ku nooshahay gobolka Washington.**
 - ❖ Waxaad dhammaan waraaqaha xaqiiqda ah ee aan ku lifaaqno ka heli kartaa halkan WashingtonLawHelp.org.
-

Maxaan ugu baahanahay qorshaha dib u bixinta?

Marka la eego sharciga gudoomiyaha, kireystayaasha waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan qorshaha dib u bixinta si loo bixiyo kiro qofka lagu lahaan tan iyo bishii Maarso 2020 wixii ka dambeeyay, taas oo aadan u bixin karin sababo la xiriira cudurka dilaacay.

-
- ❖ Macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan sharciga guri ka saarista, akhri [Coronavirus \(COVID-19\): Waxaa jira keliya sababo kooban oo milkiilahaaga guriga kaaga saari karo guriga hadda](#)
-

Guriga lagaagama saari karo inaad bixin weysay kirada inta lagu jiro hakinta, haddiiba bixin la'aanta ay la xiriiro COVID-19. Mulkiilaha gurigaaga ayaa laga yaabaa inuu ku weydiisto inaad gasho qorshaha dib u bixinta si aad u bixiso kirada lagugu leeyahay. Qorshahani waa inuu noqdaa mid u gaar ah awoodaada bixinta lacagta. Haddii aad diiddo qorshaha ama aad ku guuldaraysato inaad lacagta ku bixiso qorshe aad oggoshahay, waxaa lagaa saari karaa guriga kadib marka hakadka/xadidaada uu dhammaado.

-
- ❖ **Adiga ayaa wali masuul ka ah bixinta kiradaada.** “Mamnuuca guri ka saarista” oo kaliya joojisa hanaanka guri ka saarista. Haddaad bixin karto kirada, ama qayb ka mid ah, bixi!
-

Sideen ku ogaadaa haddii qorshaha dib u bixinta lacagta ay tahay mid macquul ah?

Amarka gudoomiyaha ayaa sheegaya in milkiiluhu guriga uusan kaa saari karin guriga maadaama aad bixin waysay kiro marka laga reebo haddii aad diido ama aad ku guuldaraysato inaad ku bixiso lacagta qorshaha dib u bixinta oo ku saleysan dhaqaalahaaga, caafimaadkaaga, ama duruufaha kale.

Tusaale ahaan, haddii aanad haysan dakhli ama aadan haysan lacag, waxaa macquul ah inaad u sheegto milkiilaha guriga inaad bixin karin kirada lagu leeyahay illaa aad shaqo ka hesho mar kale.

Kawaran haddii mulkiilaha guriga uusan i siin qorshaha dib u bixinta lacagta oo aan macquul ahayn?

Haddii mulkiilahaagu uusan ku siin ama uusan oggolaan qorshe macquul ah, iskama dayi karaan inay kirada kaa qaadaan. Kuma soo oogi karaan amaahdaada, kuguma dacwayn karaan si ay kaaga qaadaan kirada, ama kaama saari karaan guriga maadaama aad bixin weyday lacagta.

Kawaran haddii aan oggolaado qorshaha dib-u-bixinta lacagta oo aan bixin waayo?

Milkiiluhu guriga ayaa kaa saari karaa guriga markii uu dhamaado hakinta/xayiraadda. Waa muhiim inaad oggolaato qorshaha dib-u-bixinta lacagta keliya haddii aad hubto inaad bixin karto. **Ha isku cadaadinin inaad oggolaato wax aadan bixin karin. Haddii lagu cadaadiyo, cabasho u gudbi Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.** (Macluumaadka xiriirka ka eeg halkan hoose.)

Miyay tahay inaan bixiyo kirada ka dib markay hakintu/xayiraadu dhamaato?

Haa. Haddii aadan bixin kirada wixii intaa ka dambeeya, waa lagaa saari karaa guriga.

Hadda, sharci gobol oo cusub oo dhaqan galay Juun 11, 2020 ayaa laga yaabaa inuu ku siiyo xulashooyin ku aadan goorta kiradaada ay tahay inaad bixiso. Akhriso [Ma Beddeli Karaa Taariikhda Kiradeyda ay tahay in la Bixiyo](#). Tani waxay sidoo kale kaa caawin kartaa inaad iska ilaaliso khidmadaha soo daaha.

Ma heli karaa caawimaad ah in la iga bixiyo kirada?

Waxaa laga yaabaa. Isku day inaad raadiso ilo badan oo caawimaada bixinta kirada ah, oo ay ku jiraan:

- Iskuday inaad wacdo 2-1-1 ama booqo wa211.org.
- Waaxda Adeegyada Dadweynaha iyo Caafimaadka (DSHS) waxay leedahay barnaamijyo laga yaabo inaad u qalanto. Booqo washingtonconnection.org si aad uga codsato khadka tooska ah, ama wac xarunta xiriirka macaamiisha ee DSHS adigoo isticmaalaya lambarka 877-501-2233.
- Ka hubi khadka internetka www.wapartnership.org/get-help/find-by-list si aad u hesho hay'adaha bulshada ee kuu dhow.
- Hubi Ururka Guryaha Kirada ee Washington, ee ka hoos fiiri “Kaalmada Dhaqaale ee Kireystayaasha” ee www.rhawa.org/covid-19#financialrenters,
- Shabakadda Wadajirka Muhaajiriinta Washington waisn.herokuapp.com
- Khadka tooska ah ka raadi Urur Iskaashatada Horumarinta Dhaqaalaha (ADO) ee kuu dhow: www.commerce.wa.gov/growing-the-economy/local-economic-partnerships.

Mulkiilaha gurigayga wuxuu isku dayayaa inuu kirada iga qaado ama uu iga saaro guriga hadda.

Raadso caawimaad sharci isla markiiba.

- **Si oonleen ah uga codso CLEAR*Online - nwjustice.org/get-legal-help**
- **Degmada King**, wac 2-1-1 maalmaha shaqada inta udhaxeysa 8:00 subaxnimo - 6:00 fiidnimo. Waxay kuu gudbin doonaan bixiyaha kaalmada sharciga.
- **Wixii ka baxsan Degmada King, wac khadka taleefanka ee CLEAR: 1-888-201-1014**, maalmaha shaqada inta udhaxeysa 9:15 subaxnimo iyo 12:15 duhurnimo
- **Dadka waawan (ee jira 60 ama kasi wayn)** waxay wici karaan CLEAR*Sr kana wici karaan 1-888-387-7111, gobolka oo dhan ah.

- **Dadka dhagaha la', dadka dhagaha culus ama hadalku dhibaayo** waxay wici karaan CLEAR ama 211 (ama taleefan bilaash ah 1-877-211-9274) ayagoo isticmaalaya adeegga dadka dhagaha la' ee ay doortaan.

CLEAR iyo 211 ayaa ku siin doona turjubaano bilaash ah.

Sidoo kale, ogeysii **xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee gobolka** in milkiilaha gurigaaga uu isku dayayo inuu kaa saaro guriga:

fortress.wa.gov/atg/formhandler/ago/COVID19EvictionComplaintForm.aspx.

Waxaan sidoo kale haynaa foomam saambal ah oo aad isticmaali karto, iyadoo kuxiran xaaladaada.

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo laxariira xaquuqaaga iyo waajibadka kusaaran. Maaha daliil talo dhanka sharciga ah oo gaar ah.

© 2020 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loosiiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Alliance for Equal Justice (Ururka isbahaysiga Sinaanta Cadaalada) iyo shaqsiyaad sababo kabaxsan ganacsi oo kaliya.)

Foomka #1 - Waxaad u isticmaali kartaa foomkan si aad u soo jeediso qorshaha lacag-bixinta:

Gacaliye _____:

Magacaygu waa _____. Waxaan ahay kireystahaaga, oo ku nool:

_____ [cinwaanka].

Sida dadka badankood, waxaan waayay dakhli sababo la xiriira cudurka korona fayras. Waxaan sameynayaa wax walba oo aan kari karo si aan u helo kaalmo dhaqaale. Waxaan sameeyey dhamaan waxyaabahan soo socda [ku dar wixii aad sameysay: dalbashada gunnada shaqo la'aanta, raadinta shaqo kale, codsashada gunnooyinka kale ee dowladda, iyo wixii la mid ah]:

Laakiin wali waa la rafaanayaa. Ma awoodi karo inaan kirada u bixiyo si buuxda ama aan ku bixiyo waqtigeeda bilaha soo socda.

Waxaan rajeynayaa inaad igala shaqeyn doontid si aan ula imaado qorshe lacag bixineed oo macquul ah si aad adiguna uhesho lacagaha kirada anigana aan u sii joogo gurigeeyga. Waan ku faraxsanaan lahaa inaan kulano (taleefan ahaan ama wicitaan fiidiyoow ah, ama iimayl ahaan) si aan uga wada hadlo fursadaha lacag bixinta. Waxaad igala soo xiriiri kartaa lambarka taleefankan ama cinwaanka iimaylkan: _____.

Waxaan fahansanahay in caawimaad dheeraad ah loo heli karo milkiilayaasha guryaha iyo kiraystayaasha. Waxaan codsan doonaa wixii barnaamijyo ah ee aan heli karo. Waxaan rajeynayaa inaad diyaar u tahay inaad sidoo kale sameyso.

Runtii waxaan rajeynayaa inaan ka wada shaqeyn karno arrintan. Waxaan rajeynayaa inaan jawaab kaa helo. Mahadsanid,

Saxeexa Kireystaha

Taariikhda la saxiixay

Form #1 - You can use this form to propose a payment plan:

Dear _____:

My name is _____. I am your tenant, living at:

_____ [address].

Like so many people right now, I have lost income due to the coronavirus. I am doing everything I can to find financial assistance. I have done all of the following *[include what you have done: applied for unemployment, looking for other work, applied for other government benefits, and so on]*:

But I am still struggling right now. I may not be able to pay my rent in full or on time in the coming months.

I hope you will work with me to come up with a reasonable payment plan so you will get rent payments and I will keep my housing. I would be happy to meet (by phone or video call, or through email) to discuss the options for payment. You can reach me at this phone number or email address: _____.

I understand more assistance may become available to landlords and tenants. I will apply for any programs that are available to me. I hope you are willing to do the same.

I really hope we can work together on this. I look forward to hearing back from you.

Sincerely,

Tenant Signature

Date signed

Foomka #2 - Waxaad u isticmaali kartaa foomkan si aad u samayso qorshaha dib u bixinta lacagta

Qorshaha Dib u Bixinta Kirada

Qorshahan dib u bixinta lacagta waxaa laga galay iyadoo la raacayo Baahinta Guddoomiyaha Inslee (Governor Inslee's Proclamation) ee 20-19.4.

Kireystaha: _____

Milkiilaha guriga/Wakiilka Milkiilaha: _____

Cinwaanka guriga kireysan: _____

Wadarta kirada lagu leeyahay: \$_____

Maarso	\$_____	Agoosto	\$_____
Abril	\$_____	Sebtember	\$_____
Meey	\$_____	Oktober	\$_____
Juun	\$_____	Nofember	\$_____
Luulyo	\$_____	Diseember	\$_____

Bixinta wadarta lacagta ugu dambeyn taariikhda: _____.

lacag bixinta 1aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

lacag bixinta 2aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

lacag bixinta 3aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

lacag bixinta 4aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

lacag bixinta 5aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

lacag bixinta 6aad oo ah \$_____ la bixin doono _____.

Lacag bixinada dheeraadka ah:

Mulkiilaha guriga wuxuu oggolaanayaa in lacag bixinta uu ka aqbali doono meel kasta oo ay ka timaado, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn hay'adaha samafalka, ururada aan macaash doonka ahayn, hay'adaha dowladda, iyo kaniisadaha.

Mulkiilaha guriga wuxuu oggolaanayaa inuu ku aqbaldo lacagta kaasha ahaan, jeeg, jeeg la xaqiijiyay, ama amar lacageed.

Kireystaha

Milkiilaha

Taariikhda

Taariikhda

Form #2 - You can use this form to make your repayment plan

Rent Repayment Plan

This payment plan is entered into under Governor Inslee's Proclamation 20-19.4.

Tenant: _____

Landlord/Agent for landlord: _____

Rental unit address: _____

Total rent due: \$ _____

March	\$ _____	August	\$ _____
April	\$ _____	September	\$ _____
May	\$ _____	October	\$ _____
June	\$ _____	November	\$ _____
July	\$ _____	December	\$ _____

Payment of total by date: _____

1st payment of \$ _____ due on _____.

2nd payment of \$ _____ due on _____.

3rd payment of \$ _____ due on _____.

4th payment of \$ _____ due on _____.

5th payment of \$ _____ due on _____.

6th payment of \$ _____ due on _____.

Additional payments:

Landlord agrees that payment will be accepted from any source, including but not limited to charities, non-profit organizations, government entities, and churches.

Landlord agrees to accept payment in cash, check, certified check, or money order.

Tenant

Landlord

Date

Date